

# Baarista iyo Qiimeynta Carruurta

Baarista iyo qiimeyntu waxa ay bixiyaan macluumaad qiimo leh oo ku saabsan danaha, awoodaha, iyo baahiyaha canug kasta. **Baarista** waxa ay bixisaa snapshot sanadeed degdeg ah oo ku saabsan habdhaqanka guud iyo horumarka canuga. **Qiimeynta** waa hawl socota oo ay ku jirto indho-indheyn waxayna bixisaa macluumaad ku saabsan koboca muddo kadib. Carruurta waxay u koraan oo u kobcaan heerar kala duwan. Baaritaanada iyo qiimeynta waxa ay gacan ka geystaan aqoonsiga marka taageero iyo wax ka qabashooyin dheeraad ah ay lagama maarnaan yihiin.



## Baaritaanada

Tijaabo gaaban ama su'aalo-weydiimo cilmi baaris ku saleysan. Waxa ay weydiisaa su'aalo ku saabsan koboca canuga dhinacyada oo dhan. Kuwani waxaa lagu dhammeystiri karaa iskaashiga qoysaska ee xirfadlayaasha caafimaadka ee tababaran ama xirfadlayaasha waxbarashada dhallaanka waxaana lagu qaban karaa goobaha caafimaadka ama dugsiga canugga. Baaritaanadu waxaa looga gol leeyahay in gacan looga geysto aqoonsiga carruurta laga yaabo in ay qabaan dib u dhac koboca ah waxayna bixin karaan xog aasaasi ah oo tilmaan wanaagsan u noqon karta awoodaha iyo baahiyaha canugga. Baaritaanadu waxa ay sidoo kale xaqiijiyaan in dib u dhac kasta oo suuragal ah la aqoonsado si loogu gudbiyo adeegyada kale ee ku habboon.

*Carruurta 3 jirka ah waxay heli doonaan baaritaanno badan oo la dhammeeyay iyada oo ay ugu wacan tahay korriinkooda iyo kobocooda degdegga ah.*

## Qiimeynta

Baaritaan muddo socda oo ku saabsan koboca canugga. Tani waxaa ay xaqiijisaa in canugu horumarayo oo uu gaarayo guulo muhiim ah. Qiimeynta joogtada ah waxay taageertaa waxbarashada, gacan kageysataa aqoonsiga baahiyaha gaarka ah, waxayna dadka waaweyn ku hagtaa in ay u shakhsiyeyaan una jawaabaan canug kasta. Waxay gacan kageysataa wargelinta qorsheynta manhajka iyo baridda guud ahaan dhinacyada koboca.

## Mabaadii'da Muhiimka ah

Waalidka iyo daryeelayaasha waa kuwo qeyb ka ah hawsha.

- Xogtu waa mid aad sax u ah marki laga helo ilo kala duwan iyo xaalado badan.
- Hawlaha iyo goobaha waa in ay khuseeyaan oo uu yaqaano canugga.
- Qiimeeyayaashu waa kuwo yaqaano loona tababaray aalada(ha) gaarka ah.
- Aalada(ha) la adeegsado waa in ay noqdaan kuwo caadi ah, la isku halayn karo, lana ansaxiyay.
- Aalada(ha) waa in ay dhaqan ahaan iyo luqad ahaanba ku habboon yihiin.

## KHAYRAADKA

XARUNTA WAXBARASHADA IYO AQOONTA DHALLAANKA  
Baarista iyo Qiimeynta Carruurta  
<https://eclkc.ohs.acf.hhs.gov/child-screening-assessment>

CENTERS FOR DISEASE CONTROL AND PREVENTION  
(XARUMAHA XAKAMAYNTA IYO KAHORTAGGA CUDURRADA)  
La Socodka iyo Baaridda Koboca  
[www.cdc.gov/ncbddd/actearly/screening.html](http://www.cdc.gov/ncbddd/actearly/screening.html)

NAEYC – DAP: Indho-indheynta, Diiwaangelinta, iyo Qiimeynta  
Koboca iyo Waxbarashada Carruurta  
[www.naeyc.org/resources/position-statements/dap/assessing-development](http://www.naeyc.org/resources/position-statements/dap/assessing-development)

DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, asal ahaan halka uu kasoo jeedo, muwaadinimada ama xaalada socdaal, da'da, wacyiga jinsi ama aqoonsiga jinsiga, mujaahid ama xaalada milatari, xaalada hooyada ilmaha naas-nuujinaysa, iyo helitaanka dareen kasta oo jidheed, ama naafanimo maskaxeed ama isticmaalka hagitaanka eyga ama adeegyada xayawaanku qabto. Haddii aad rabto nuqullo dhukumenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (DCYF Xidhiidhaha Qeybaha) 1-800-723-4831 ama iimaylka [communications@dcyf.wa.gov](mailto:communications@dcyf.wa.gov).

DCYF PUBLICATION EL\_0082 SM (02-2024) Somali



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**